

Bakteeriyada Salmonella

Public Health
Seattle & King County



Waa maxay Salmonella? *Salmonella* waa bakteeriyada sababta shubanka. Calaamadaha jirradan/caabuqan badanaa waxay bilaabmaan inta u dhaxaysa 6 saacadood ilaa 6 maalmood ka dib qaadista/haleelidda bakteeriyada. Astamaha qaar ee cudurka waa:



Calool xanuun



Shuban (mararka qaar dhiig leh)



Qandho

Sidee ayuu cudurka ku faafaa? *Salmonella* waxa ay ku dhex noolaan kartaa saxarada iyo bay'ada dadka iyo xoolahaba. Waxay sidoo kale ku dhex jiri kartaa cuntada, ciida, iyo biyaha. Waxaad la xanuunsan kartaa cudurka markaad:



Cunto hilib aan si fiican loo karinin ama cunto cunno wasakhaysan



Ka boodista gacmo-dhaqashada, gaar ahaan ka hor wax karinta



Dhunkashada ama taabashada xayawaanka, saxaradooda, ama bay'adooda.

Yaa halis ugu jira inuu aad ula xanuunsado?



Dadka waaweyn (da'da 65+)



Carruurta kuwa ka yar-yar 5 sano



Dadka habdhiska difaaca jirkooda uu daciif yahay

Maxaan sameeyaa haddii aan la xanuunsado?

Guriga joog ilaa aad shuban la'aan ka noqoto. Tani waa run, gaar ahaan haddii adiga ama ilmahaagu aad ka shaqeysaan adeegga cuntada, goobaha xannaanaynta carruurta, ama daryeelka caafimaadka, ama aad tagtaan goobaha xanaanada carruurta.




Sideen isaga ilaalin karaa in aan qaado cudurka?



Nadiifi gacmahaaga iyo sagxadaha inta badan



Ha dhunkan xayawaanka



Hilibka cayriinka ah ka ilaali/fogeey miraha iyo khudaarta



Ku kari cuntada heerkulka saxda ah



La hadal bixiyaha daryeelkaaga caafimaadka, haddii aad u malaynayso inaad qabto caabuqa *Salmonella*. Si aad wax badan uga ogaato *Salmonella* booqo www.kingcounty.gov/cd.

Somali
6/12/2024